

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA

AGOOSTO 2020

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Agoosto


Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha

Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha (TSD) qeybahiisa kala-duwan ayaa intii lagu guda jiray bishii Agoosto 2020 hoos ugu soo dhacay 88.97 halka uu bishii Luuliya ka ahaa 89.64. Isbedelka bishii dhammaatay ee Agoosto ayaa ahaa hoos u dhac dhan -0.75 boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Luuliyada 2020 jiray korar dhan 1.51 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishaan sida xoogan hoos ugu dhacay marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: Qeybaha Dharka iyo Kabaha (-4.89 %). Cunnada iyo Cabitaanada (-1.52%), Tubaakada Iyo Qaadka (-1.07%), Agabka qalabeynta, qurxinta iyo hagaajinta guryaha (-0.81%), iyo Maqaaxiyaha iyo Hoteellada (-0.25%).

Dhinaca kale, hoos u dhac ku yimid sicirka qeybaha kor ku xusan waxaa qeyb ahaan dheelitiray in koror ku yimid sicirka qeybaha Gaadiidka (4.92%), Dhaqanka iyo Madandaalada (3.26%), Caafimaadka (3.11%) iyo qeybta badeecadaha isku jirka ama isku dhafka ah (1.44%). Tan ayaa horseeday isu dhawaanshaha heerka tusaha Guud iyo Jiitimaad ku sugnaanshaha Jaantuuska dhaqdhaqaaqa Tusaha guud ee sicirka dambiisha adeegga.


Jaantuuska Iaad: Jaantuusyada Heerka Sicir Bararka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Juun 2020



Jadwalka Iaad: Heerka Sicir bararka billaha ah ee -Agoosto 2020 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Juulay	
Tusaha (bishan) = Agoosto 2020	88.97
Tusaha (bishii hore) = Luuliyo 2020	89.64
Tusaha (sanadkii hores isla bishan) = Luuliyo 2019	83.69
Isbedelka % bilaha ah = Luuliyo 2020/ Agoosto 2020	-0.75
Isbedelka % sanadlaha ah (heerka sicir bararka) = Agoosto 2019/Agoosto 2020	6.31

Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedellada Ugu Waaweyn Ee Bilaha Ah Iyada Oo Loo Eegayo Hanaanka Caalamiga Ah Ee Kala Saarida Qaybaha Badeecadaha.



Qaybaha Isbedelka uga badan ee dhanka Taban Ku Yimid Bisha Agoosto 2020

- **Dharka Iyo Kabaha** sicirkooda ayaa bishii Agoosto 2020 hoos u dhacay (-4.89%), marka la barbar dhigo bishii Luuliyo oo la diiwaan geliyey koror dhan (0.99%). Hoos u dhaca bishaan waxaa loo tirinayaa qiimaha Dharka oo raqiisay (-5.79%) iyo Kabaha oo jabay (-0.40%).
- **Cuntada Iyo Cabitaanadda** sicirkooda ayaa hoos u dhacay 1.5 boqolkiiba bishii dhammaatay ee Agoosto 2020 marka loo-barbar dhigo korarkii bishii Luuliyo oo ahaa (3.14 %). Qiimo dhaca qeybta cuntada iyo cabitaanada ee bisha Agoosto keenay sicirka Cabitaanada oo hoos u dhacay (-2.40%) iyo sicirka cuntada oo isna yaraaday (-1.48%).
- **Sicirka Tubaakada iyo Qaadka** ayaa intii lagu guda jiray bishii tagtay ee Agoosto 2020 hoos u dhacay (-1.07%) Marka loo eego bishii ka horeysay ee Luuliyo oo uu jiray hoos u dhac dhan (-1.09%). Hoos u dhaca bishaan ayaa waxaa keenay Qaadka (-3.23%).
- **Sicirka Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada** ayaa isna bishii dhammaatay ee Agoosto 2020 waxay hoos u dhaceen (-0.81%) boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Luuliyo la diiwaan geliyey hoos u dhac dhan (-0.35%). Sicir jabka bishaan ee alaabaha qeybtaan ayaa waxaa keenay sicirka agabka iyo qalabka guryaha oo hoos u dhacay (-7.98%) iyo sicirka adeegga dayactirka guryaha oo hoos u dhacay (-5.26%).
- **Sicirka cunnada iyo adeegyada Maqaaxiyaha & Huteelada** ayaa bishii tagtay ee Agoosto waxaa ku yimid hoos u dhac dhan (-0.25%), halka bishii ka horeysay ee Luuliyo ay qeybatani diiwaan gelisay sicir jab gaaraya (-0.35%). Hoos u dhaca bisha Agoosto waxaa loo aanaynayaa adeegga jikada oo hoos u dhacay (-1.21%).

Qaybaha Isbedelka Togan ee Xooga-leh Ku Yimid Bisha Agoosto 2020

- **Gaadiidka:** Sicirka gaadiidka ayaa kordhay (4.92%) intii lagu guda jiray bishii Agoosto ee 2020, Marka loo eego bishii Luuliyo ee isla sanadkaan la diiwaan geliyey koror aad u yar oo gaarayey (0.63%). Kororka bishaan ayaa gabi ahaanba waxaa loo tirinkaraa kobaca iibka baabuurta (8.48%) iyo adeega gaadiidka (5.36%).
- **Dhaqanka iyo Madadaalada:** badeecadaha iyo adeegyada dhaqanka iyo madandaalada ayaa bishii laso dhaafay ee Agoosto 2020 la kulmay koror gaaraya (3.26), halka bishii ka horeysay ee Luuliyo uu jiray sicir kac dhan (0.589%).
- **Caafimaadka:** Sicirka adeega iyo qalabka caafimaadka ayaa bishii gudubtay ee Agoosto waxay siyaadeen (3.11%) marka la barbardhigo bishii ka horeysay ee Luuliyo oo la diiwaangeliyey qiimo kac intaas ku dhow oo gaarayey (3.05%). Sicirka kac bishaan ee qeybtaan ayaa loo sababeynayaa koror ku yimid adeegga cisbitaallada (6.58%) iyo adeegga bukaan socodka oo sicirkoodu kordhay (2.98 %).
- **Qaybta Adeegyada isku dhafka ah (Miscellaneous):** badeecadaah iyo adeegyada ay ka koobantahay qeybtani ayaa bishii gudubtay ee Agoost waxaa sicirkoodu siyaaday (1.44%), halka bishii ka horeysay ee Luuliyo ay qeybtani waajahday koror dhan (0.75%). Qiimo kaca qeybtaan ee bishaan ayaa inta u badan waxaa loo aanayn karaa adeegyada isqurxinta ((5.75%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay ee Bisha Luuliyo 2020.

Cuntada Iyo Cabitaanada, Kirada Guryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaaladda Kale ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugu muhiimsan dambiisha Addegga, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahan inay saameynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.


Sicirka Cuntada Iyo Cabitaanada ayaa intii lagu jiray bishii Agoosto 2020 waxaa ku yimid qiimo jab gaaraya (-1.52%) marka loo barbar dhigo bishii Luuliyo oo uu jiray sicir kac dhan (3.14 %). Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada sanad dhamaadka bisha Agoosto 2020 ayaa gaarayey (8.02%) marka loo eego sicir bararka sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku ekaa Luuliyo 2020 kaas oo gaarayey (7.13%).

Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada

Magaca shayga	Juun	Luuliyo	Agoosto
Cuntada iyo Cabitaanada	0.17	3.14	-1.52
Cuntada	0.22	3.29	-1.48
Rootiga, Bariisaka, Burka iyo badarka	-1.31	-0.08	-4.28
Sonkorta	-2.85	-0.86	1.54
Hilibka noocyada xoolaha	0.2	5.61	-2.06
Kalluunka	0	0	7.72
Caanaha liiska ah iyo kalluunka	1.43	-0.61	0.52
Saliida iyo ashyaada dufanka leh	1.42	-0.04	-6.34
Miro Beeraadka sida Cambaha & Muuska	0.73	1.98	-8.57
Khudaarta Cagaaran	0.2	18.40	-3.37

Sicirka Qaybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska Iyo Shidaalada Kale ayaa bishii Agoosto wajahday sara u-kac aad u yar oo gaaraya (-0.04%) halka uu bishii Luuliyo la diiwaan gashay hoos u dhac gaaray (-0.13%). sicir bararka sanadlaha ah ee 12kii bilood ee ku ekaa Agoosto 2020 ayaa ahaa koror dhan (1.08%), halka sanadkii ka horeeyey ee ku dhammaanayey bishii Luuliyo ee 2020 la diiwaangashay sicir koror dhan (2.94%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay




Source: Puntland Statistics Department

Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Agoosto 2020

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicir bararka ee 12kii billood ee u dhexeeyey billihii Agoosto 2019 iyo Agoosto 2020 ayaa ahaa 6.31 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii ku ekaa Luuliyo 2020 la diiwaan gashay sicir koror dhan 6.50 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaday 12-kii bilood ee u dhexeeyay Agoosto 2019 iyo Agoosto 2020 ayaa kala ah: dhaqanka iyo madandaalada (+23.68%), Maqaaxiyaha iyo Huteelada (+19.33%), Caafimaadka (15.75%), Tubaakada iyo Qaadka (10.40%). Gaadiidka (8.40%), Cuntada iyo Cabitaanada (7.92%). Guud ahaan qaybaha badeecadaha oo dhan ayaa la kulmay sicir kac togan.

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Agoosto 2020.



Qaybaha sicir bararka Xoogan ee sanadlaha ah uu ku dhacay sanad dhamaadka Agoosto 2020

- **Dhaqanka iyo Madadaalada** ayaa sanad dhmmaadkii Agoosto 2020 Kor u kacay 23.68%, halka sanad dhamaadkii Luuliyo 2020 uu kordhay 7.20%, kor u kacaan waxaa sababay sicirka buugaagta oo kor u kacay (47.67%) iyo Agabyadda kale ee dhaqanka iyo madadaalada oo Iyana kacay (42.88%)
- **Makhaayadaha Iyo Huteelada** ayaa sanad dhmmaadkii Agoosto 2020 Kor u kacay 19.33% halka sanad dhamaadkii Luuliyo 2020 uu kordhay 9.90%, kor u kacaan waxaa sababay sicirka Makhaayadaha (+21.04%) iyo Hoteelada (7.76%).

- **Caafimaadka** ayaa sanad dhammaadkii Agoosto 2020 kor u kacay 15.75% marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Luulyo 2020 oo uu kor u kacay 8.60% Sicir kororkan waxaa sababay Adeegyada Cusbitaalada oo siyaaday (+30.06%), iyo sicirka agabka caafimaadka (16.37%).
- **Sicirka Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa sanad dhammaadkii bisha Agoosto 2020 kor u kacay 10.40% halka uu sanad dhamaadkii Luulyo 2020 uu kordhay 19.09%, Kor u kacan ayaa ka yimid: Jaadka (+13.53%). iyo Tubaakada (+9.16%).
- **Gaadiidka** ayaa sanad dhammaadkii Agoosto 2020 kor u kacay 8.40% marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Luulyo 2020 uu kordhay 19.09%, Kor u kacan ayaa ka yimid Gadashada Gawaaridda oo siyaadey (12.10%) iyo Adeega Gaadiidka (10.66%).
- **Sicirka Cuntada Iyo Cabitaanada** ayaa sanad dhammaadkii Agoosto 2020 kor u kacay 8.02% marka la barbardhigo sanad dhamaadkii ka horeeyey ee Luulyo 2020 uu kordhay 7.13%, Kor u kacan ayaa ka yimid sicirka cunnada oo kacay (8.35%) iyo Cabitaanadda (0.90%).


Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha TSD ayaa sanad dhamaadkii Agoosto 2020 ahaa mid togan.

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqaha iyo Dhibco ku biirinta Miisaaman

Jadwalka 3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Agoosto 2020 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Aug-19 Index	Jul-20 Index	Aug-20 Index	Jul-20 to Aug-20 (monthly) % change	Aug-19 to Aug-20 (annual) % change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	83.69	89.64	88.97	-0.75	6.31
Cuntada iyo Cabitaanada	80.78	88.61	87.26	-1.52	8.02
Tubaakada iyo Jaadka	89.38	99.74	98.68	-1.07	10.40
Dharka iyo Kabaha	85.45	94.72	90.09	-4.89	5.44
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda	86.28	87.18	87.21	0.04	1.08
Agabka guryaha iyo Dayactirkooda	84.31	88.25	87.54	-0.81	3.83
Caafimaadka	78.70	88.35	91.10	3.11	15.75
Gaadiidka	90.16	93.15	97.73	4.92	8.40
Isgaarsiinta	83.68	87.73	87.72	-0.01	4.83
Dhaqanka iyo Madadaalada	87.22	104.46	107.87	3.26	23.68
Waxbarashada	85.95	90.70	90.61	-0.09	5.43
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	70.76	84.64	84.43	-0.25	19.33
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	114.17	120.14	121.88	1.44	6.75

Jaantuuska 5aad: Ku Biiriinta dhibcaha iyada oo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay ku xiirantahay hadba saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.